# JAMHUURIYADA SOMALILAND
# GOLAHA WAKIILADA

## Waxbixinta Guddida Gaarka ah ee Xog-ururinta iyo u kuur galka Xaalada Magaalada Laascaanood.

*March 2023.*

*@Golaha Wakiillada JSL.*

## 1. Ujeedada magacaabista Guddida Gaarka ah ee Xaalada Magaalada laascanood ADHOC-Committee.

Ku simaha Gudoomiyaha Golaha wakiilada JSL Md Siciid Mire Faarax (Giire) ayaa xaalada laascanood ka taagan u saaray Guddi Gaar ah ama Adhoc committee sida ku cad qoraalka Xafiiska Ku simaha Gudoomiyaha tixraceeduuna yahay **GW/G/08/70/2023** kuna tarikhaysnayd **27/02/23**.

Qoraalkaas oo lagu dhisay Guddidan Gaarka ah si ay ugu kuurggalaan, darsaan xogogaalna u noqdaan xaalada dhabta ah ee Lascanood islamarkaana Gole-weynaha warbixin ku soo celiyaan.

Si waafaqsan Qodobka **53aad faqradiisa 2aad** ee xeer-hoosaadka Golaha wakiilada xeer **LR 01/2021**, waxa uu magacaabay Guddi gaar ah magacyadooduna hoos ku xusan yihiin.

| Tirsi | Magaca | Xilka |
|---|---|---|
| 1. | Md. Axmed Cabdi Ibrahim (Timo-jilic) | Guddoomiye |
| 2. | Md. Cabdinasir Yuusuf Cismaan | G/ xigeen |
| 3. | Md. Barkhad Jaamac Batuun | Xog-Guddida |
| 4. | Md. Maxamed Xasan Siciid | Xubin |
| 5. | Md. Cali  Xuseen Beegsi | Xubin |
| 6. | Md. Axmed Muuse Jaamac | Xubin |
| 7. | Md. Suleiman Mohamed Farah (Goox) | Xubin |
| 8. | Md. Mukhtaar Xassan Maydhane | Xubin |
| 9. | Md. Xassan Saleeban (Dhuxul Laab-saalax) | Xubin |
| 10. | Md. Cabdilaahi Muuse Cabdi | Xubin |
| 11. | Md. Xuseen Ismaaciil Yuusuf | Xubin |

La taliyaha sharciga ee Guddida; Mubaarik Cabdi Ismaaciil

Xog-hayaha; Guddida Cabdilaahi Cabdi Aaden.

## 2. Qorshe hawleedkii Guddida.

1. In wax laga ogaado Dhamaan waxyaabihii keenay Dagaalka Laascaanood iyo Gadoodkii Shacabka.
2. In Gudidu Hubiso in taakulo Gaadhay shacabkii ku barakacay magaalada Laascaanood iyo Dhaawacyada Ciidamada Qaranka.
3. In Xog-urin lagu sameeyo burburka soo gaadhay goobaha adeega bulshada ee Magaalada Laascaanood sida (dhakhtarada, iskuulada, addeega biyaha iyo korontada).
4. Waa in warbixin rasmi laga helo dadaalada Nabadeed ee ka socda Magaalada Laascaanood ee Gobolka Sool.

## 3. Hordhac

La soo noqoshadii madaxbanaanida Qaranimada Somaliland iyo shirkii aayo ka tashiga ee ka dhacay Magaalada Burco iyo shirarkii dawlad dhiska, sida kii Boorama iyo Hargeisa odayadii dhaqanka ee hogaaminayay reer laascanood ayaa ka mid ah sida ku cad saxeexayaasha Axdi qarameedki iyo Go'aanki Gooni isu taaga oo ay qayb ka ahaayeen Wayeelka, wax-Garadka dhamaan Gobolada Somaliland, ku waas oo ay ku jireen Wax-garadka iyo Odayaasha Gobolka Sool. Dadka reer soomaliland waxay u codeeyeen 97% Dastuurka JSl, sida ku cad qaraarka Aftida Maxakamada sare soo saartay sumadiisuna tahay **MS/GMS/G-7/134/2001** kuna taarikhaysan **13/06/2001.**

Sanadkii 2007-dii laga bilaabo Xukuumadihii kala dambeeyay ee Soomaliland Gobolka waxay ka qabteen mashaariico hormarineed iyo dhismayasha kaabayaasha dhaqaale ee Gobolka Sool, waxaa sare u kacay tiradda ardayda wax ka dhigtada waxbarashada aasasiga ah, dugsiyadda sare heer Tuulo, Degmo iyo mid Gobolba. Waxaa kale oo laga aasaasay Jaamacadda Nugaal iyo Jaamacado kale oo xukumadihii kala duwanaa ay ka geysteen gacan dawladeed.

Balse waxa barbar socday dilal qorshaysan oo Gobolka Sool ka taagna 15-kii Sanno ee la soo dhaafay lana beegsanayey Garsoorayaasha Maxakamadaha, Xeer-ilaaliyayaasha Gobolka, Madaxda Axsaabta Qaranka, Taliyayaasha Ciidamada kala duwan, Saraakiisha Komishanka Doorashooyinka Qaranka, Culimada, Ganacsatada Iyo haldoorka Bulshada Magaalada Laascanood.

In kastoo ay dilalkaa qorshaysani ay dhacayeen, waxaa Gobolka Sool, sida Goboladda kale dalka ka qabsoomay diiwaan gelinta codbixiyeeyaysha iyo doorashooyinkii kala dambeeyay ee kala ahaa, Doorashadii madaxtooyada, Doorashadii Golaha Wakiilada iyo Tii Golaha Deegaan.

Hadaba xaalada Amnidarro ee laascanood ka dhacday waxay ku soo beegantay xili dadku u diyaar garoobayeen diiwangalintii codbixiyayaasha doorashooyinka ururada iyo madaxtooyada. Urrurada **WAABERI iyo SSP** (urur siyaasadeedka shacabka) oo ay hogaaminayeen siyaasin Dobolka ka soo jeeday waxay ka mid

noqdeen ururadii ku guulaystay tartankii loogu soo baxayey ururnimadda, una diyaar ahaaa tartanka xisbinimada isla markaana rajo ka qabay inay noqdaan Axsaabta dalka.

## 4. Habraaca xog-ururinta Guddida (Methodology)

1. Hanaanka iyo habraaca ay Guddidu u martay warbixinta xaalada Amni ee Magaalada laascanood.
2. Dib u eegista wixii warbixino laga qoray shaqaaqada Laascaanood.
3. Waraysiyo Toos ah kuwo aanu u beegsanay Aaladaha Is-gaadhisiinta.

## 5. Sharciyadda ay Guddidu Daristay

Si ay u gudato waajibadkeeda, Guddidu Waxay daristay Dastuurka iyo Xeer-hoosaaka Golaha Wakiilada (Xeer lr. 01/2021).

Qodobada Dastuurka; **Qodobka 2aad farqadiisa 3aad, Qodobka 23aad Farqada 3aad iyo 4aad, Qodobka 32aad Farqadiisa1aad iyo 2aad, Qodobka 34aad Farqadiisa1aad, Qodobka 38aad farqadiisa 4aad, Qodobka 53aad farqadiisa 4aad,**

**Qodobada Xeerarka dhaqangalka ah;**

1. Xeerka ciidanka booliska xeer l.r 63/2013.
2. Xeerka ilaalinta anshaxa iyo nabadgalyada guud ee xeer l.r 51/2012.
3. Xeerka ciqaabta Guud.

## 6. Xaalada Guud ee Gobolka Sool Gaar ahaan Magaalada Laascaanood.

Rabshadaha iyo Shaqaaqooyinka hada taagan ka hor, magaalada laascanood waxay ahayd guud ahaan magaalo degan oo amni iyo kala danbayn jirto, balse waxa ka jiray faldanbiyeedyo dilal qorshaysan ah oo mudo soo socday, kuwaasi oo ku hayay warwar iyo cabsi bulshada ku nool magaalada, laguna beegsanayay haldoorka bulshada gaar ahaan masuuliyiinta xukumada Somaliland.

Waxaana joogay Ciidanka Qaranka iyo Bilayska, Maamulka Gobolka iyo deegaanka, noloshuna waxay u socotay si caadi ah. Iyada oo jiritaanka amniga iyo kala danbaynta ee ka jirtay Laasacanood ay u suurto gelisay in bulshada degaankaasi horumar dhinacyo badan taabanaya gaadhaan.

Hadaba xukumadahii kala dambeeyay ee Somaliland waxay ka qabteen gobolka Sool Gaar ahaan magaalada Laascaanood, horumar kala duwan dhanka kaabayaasha Dhaqaalaha, Waxbarashada, Caafimaadka iyo adeega caamka ah ee dadweynaha. Sidoo kale waxaa meel wanaagsan oo la hiigsan karo la gaadhsiiyay nidaamka cadaladeed, dawladaha hoose iyo maamul daadajinta.

Dhanka kale waxaa iyana dugsiyada dhexe iyo sare ee magaalada Laascaanood iyo Guud ahaan Gobolka Sool ku jiray arday tiro badan oo u fadhiisanaysay imtixaanka shahaadiga ah Ramadaanta ka bacdi ee sanadkan. (May 2023)
Waxa sidoo kale jiray arday badan oo dhiganaysay jaamacadaha kala duwan ee Gobolka iyo magaalooyinka kale ee dalka guud ahaantii, sida Jaamacada Camuud iyo Jaamacada Hargeisa.oo qaarkood ay ku jireen marxaladihii cilmi baadhista iyo qalinjabinta.
Waxa kale oo jiray arday baranaysay xirfadaha iyo farsamooyinka dhismayaasha, plumpinka, ITga, Engineeinka, mekanikada IWM, waxa furnaa goobaha suuqyada iyo shaqada.

laga soo bilaabo 2008-dii, waxaa loo qoondeeyay Gobolada barri (Sool iyo Sanaag), qoondo dhan 2% cashuuraha kastamada dalka, oo ka baxsan qoondada Guud ee Miisaaniyada Qaranka, laguna fuliyay barnaamijyo ay ka mid yihiin maamul fidinta, amniga iyo mashaariic horumarineed sida ceelal

dhaadheer, biyo Xidheeno, qodis Ceelal gacmeedyo, Dugsiyo, jaamacado, Wadooyin, cusbitaalo, iyo dhismayaasha Saldhigyada Booliska, Xarun dabdamis, iyo dayac tirka Qalabka iyo Guryaha Dawlada laakiin wixii oo dhammi waxay marayaan walli in la isu huburursado iyo bulshada oo u afduuban dad aan reer Somaliland ahayn.

Xukuumadi Madaxweyne Axmed Maxamed Maxamuud siilaanyo taarikhdu markay ahayd **21 October 2017** waxay heshiis siyaasi ah oo ka kooban 7 qodob la gashay Maamulki khaatumo ee uu hogaaminayay AHUN Marxuum Prof Cali khalif Galaydh oo lagu kala saxeexday Magaalada caynaba ee Gobolka saraar "CAYNABA AGREEMANT".

**Qodobadii heshiiskuna waxay ahayeen sidan**.

1. In la helo cadaalad, **sinaan iyo nabad ku wada noolaansho.**
2. In la wada **ilaaliyo jiritaanka iyo madaxbanaanida Somaliland**. -
3. In khilaaf kasta oo jira lagu dhameeyo **wada hadal iyo jid nabadeed.**
4. In la adkeeyo midnimada iyo nabad ku wada noolaanshiyaha
5. In dastuurka dib loo furo, si loo sugo awood qeybsi ku dhisan cadaalada iyo Sinaan, guddi joogto ahna arrintaasi loo saaro.
6. In Somaliland, ururada samafalka iyo hey'adaha jimciyada quruumaha ka dhaxeysa ay ka hawl galaan sidii mashaariic horumarineed looga fulin lahaa gobolada Sool, Sanaag iyo Buuhoodle
7. In ciidamada hubeysan ee Khaatumo la qarameeyo, oo Somaliland ay yeelato ciidan Qaran oo suga xuduudaha, jirintaanka iyo danaha Somaliland.

Heshiiskaas waxa lagu Ansixiyay Qaraar Gole, Iyada oo heshiiskaasi qodobada qaar la fuliyay, qaybihiisa siyaasiga ah, sida furista Dastuurka muu fulin.

Laascanood waxa ka dhacay doorashooyin iyo diiwangalino kala dambeeyay oo iskugu jiray, doorasho madaxtooyo baarlamaan iyo deegaan.

## 7. Asbaabta Colaada Gobolka Sool Gaar ahaan Magalaada Laascaanood.

Sannadkii 1993-kii waxay Laascaanood ahayd meelaha sida gaar ka isha loogu hayo, iyada oo laga cabsi qabay in Al-itaxaad iyo xagjiro kale Xarumo ku leeyihiin, waxana gabi ahaanba ka maqnayd xukunkii dawladnimo ee Somaliland oo wakhtigaa ku jirtay dhismaha nabad dhiska iyo Dawlad dhiska.

Sannadii 2007-dii ayay Somaliland ku gaadhay Maamul daadejin xooggan magaalada Laascaanood iyada oo aanu wax dagaal ahi ka dhicin, tan iyo intii Somaliland maamulkeedu gaadhay, laga soo bilaabo 2009-kii ilaa 2023-Dilalka Qorshayn ee ka dhacay Laascanood waa **40-dil,** halka **27-dacwadood** oo ka mid ah Maxkamad la mariyey oo xukuno ka soo baxeen, **13-dacwadoodna** lama qaban cidii falkaa gaystay walina galalkooda Dacwadeed way furan yihiin.

### Isu soo baxyaadii shacabka ee dilkii Hadraawi

**26 -December 2022-ka** waxaa Magaalada Laascaanood ee Gobolka Sool ka dhacay dil loo gaystay Marxuum AHUN Cabdifataax Cabdilaahi Cabdi (Hadraawi), kana tirsanaa mid ka mida asxaabta qarranka dilkaasi oo ay gaysteen dablay hubaysan oo aan haybtooda la aqoonsan, dilkani waxa uu sababay in magaalada Laascaanood ay ka dhacaan mudaaharaado joogta ah oo keenay isku dhacyo ciidamada nabad galyada iyo mudaaharadayaashii kaasi oo dad ku dhinteen kuwa kalena ku dhaawacmeen.

### Shirka Garaadada, iyo mawqifka xukumadda ee qabsoomida shirka;

Xukuumada Somaliland waxay ogolaatay qabsoomida shirka Garaadada ee Gobolka Sool iyo 33ka Xubnood. Kadib madax dhaqameedkii joogay magaalada laas-canood ayaa shir deg-dega iskugu yimid si xiisada loo damiyo, waxayna ku baaqeen in shir weyn isugu yimaadaan dhamaan garaadada gobolka sool.

Waxaa magaalada laas-canood ku soo qulqulay ergadii shirka ee garaadada kala duwani hogaaminayeen oo qoorkoodna la soo galeen Maleeshiyaad

hubaysan, sidoo kale na ciidamada Somaliland ayaa sugayay nabad-galyda guud ee garaadada iyo goobta shirkaba, Waxaana xusid mudan in aanay dhicin falal Amni darro intii uu shirku socday.

Gabo-gabadii shirkaa waxaa ka soo baxay qodobo lidi ku ah Jiritaanka Qaranimada Somaliland iyo Soohdimaheeda dhuleed ee ku xusan Qodobka 2aad Farqadiisa 3aad ee Dastuurka Somaliland una dhigan sidan **(Dhulka Qaranku waa Muqadas waana laguma Xad-gubaan)** Intaa ka dib waxaa bilaabmay qul-qulatooyin iyo dagaalo joogta ah oo u dhexeeya ciidamada Somaliland iyo maleeshiyooyin hubaysan, taas oo halis galisay noloshii dadka rayidka ah ee gobolka Sool gaar ahaan magaalada Laascaanood.

**Khasaaraha nafeed iyo hantiyeed ee uu gaystay dagaalka Laascaanood;**

Intii uu socday dagaalka magaalada Laascaanood waxaa ka dhacay khasaare nafeed, hantiyeed,oo aad u tiro badan oo soo gaadhay , ciidanka qaranka dadka rayidka ah ,iyo maleeshiyadka hubaysan waxa xusid mudan inaanay guddidu xaqiijin karin baaxada khasare ee ka dhacay magaalada maadama oo aanay goobta tagin sababo amni awgeed .isla markaaana baahin karin tirooyinka lala wadaagay xilligi ay xogururinta ku jirtay.

Guddida waxa soo gaadhay qoraal sheegaya in kaalmooyin dawladu gaadhsiisay qayb ka mid ah qoysaska ku barokacay dagaalka laascaood, balse guddidu ma xaqiijin karto tirada kaalmada maadama oo aanay goobta tagin.

## 8. Hay'addaha Deeqaha Gaadhsiiyay Barakacayaasha.

| Tirsi | Hay'adda | Adeega | Goobaha | Gobolka | Wakhtiga Labilaabay | Wakhtiauu Soconayo |
|---|---|---|---|---|---|---|
| 1. | **Acted** | **3,000** lacag cadaan ah | • Adhi-cadeeye<br>• Tuulo Samo-kaab<br>• Yagoori | **Sool** | **21- 02 -23** | **4-bilood** |
| 2. | **Save the children** | 320 Booyadood oo biyo ah kana faa'iidaysteen 8,124 qoys | • Xudun | **Taleex** | **19 -02 -23** | **7- Maal-mood** |
| | | | • Guumays<br>• Adhi-cadeeye | **Sool** | | |
| | | | • Tuulo Samo-kaab IDP<br>• Awr-boogays | **Sanaag** | | |
| | | | • Ka-baalka Xagaga<br>• Bali Hadhac<br>• Goljanno<br>• Yaaheel<br>• Yagoori<br>• Yayle | **Sool** | **29 - 02 -23** | **7- Maal-mood** |
| 3. | **UNHCR/NRC** | 1,000 Alaabooyinka aan Cuntada Ahayd | • Ceerogaabo<br>• Fiqi-fuliye<br>• Ardaa<br>• Awr-boogays | **Sanaag** | **29-02-2023** | **Mar kali ah** |
| | | | • Guumays | **Sool** | | |
| | | | • Sarmaanyo<br>• Xabaalaha camare | **Sanaag** | | **Mar kali ah** |
| 4. | **Taakulo/WVI** | Lacag Cadaan ah iyo alaabooyinka aan cuntada ahayn NFI | • Buuhoole | **Togdheer** | **04- March** | **Mar Kaliya** |

| | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|
| **5.** | **Alight** | • Biyo Dhaamin 1,000 Qays.<br>• Agab Caafimaad Cusbitaalka Lasanod. | • Laascaanood | **Sool** | **15- March** | **Mar kaliya** |
| **Wadarta Guud** | | **10,534 Qoys (una dhiganta 63,204 qof)** | **19 Goobood (Marka laga reebo Goobaha soo noq-noqday)** | | | |

## 9. Kulanadii Shaqo ee Guddida;

Guddidu si ay u hesho xogo ku salaysan xaqiiqooyinka xaalada Magaalada waxay sameeyeen waraysiyo ay la yeesheen ha'yadaha dawlada gaar ahaan qaybaha Amniga iyo adeega caamka ah, sidoo kale waxay sameeyeen waraysiyo Khadka telefoonka ah iyo aaladaha fogaan araga ah oo ay la yeesheen masuuliyiinta degmada kulanadaas oo kala ahaa sidan.

1. Kulanka Guddida Wasiirada ee Arrimaha siyaasada ee Laascaanood.
2. Kulanka Guddida ee wasiirada Abaabulka iyo Wacyi-galinta arrinta laascanood.
3. Kulanka Xidhibaanada Golaha Wakiillada ee Gobolka Sool.
4. Taliyaha Ciidanka Booliska.
5. Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.
6. Golaha deegaanka ee degmada Laascanood.
7. Xisbiga WADDANI.
8. Xisbiga UCID.

## 10. Natiijada Warbixinta Guddida.

Guddidu waxay Xog-ururinteeda ku ogaatay qodobadan;

In Waxyaabaha Hoos ku xusani ay sababeen Gadoodkii shacabka iyo Dagaalka Laascaanood.

1. **Dilalkii Qorshsaynaa;**
   - Waxa magaalada Laascaanood ka socday dilal qorshaysan oo ay soo maleegayeen argagixisadu, kuwaasi oo ujeedada laga lahaa ahayd in shacabka lagu kiciyo.
   - Dilalkaasi qorshaysnaa waxa ay ku abuureen bulshada walwal isla markaasina waxa ay u arkeen kuwo u gaar ah bulshada degta Laasa-anood, madaama oo dhamaan gobolada kale ee dalka aanay ka dhici jirin
2. **Shacabka qaar oo aan ogolayn Somaliland;**
   - Waxa jiray in shacabka ka soo jeeda gobolka qaybo ka mid ahi aanay ogolayn ka mid ahaanshaha Somaliland
   - Waxa jira in qurbo joog badan oo gobolka ka soo jeedaa ay ka soo hor jeedaan ka mid ahaanshaha Somaliland.
3. **Farogelin Shisheeye;**
   - Farogelinta shisheeye oo lagu abaabulayay kulamo ku salaysan qabyaalad, kuwaasi oo lagu kicinayay bulshada reer Laasa-anood iyo sidii ay uga hor iman lahaayeen qaranimada Somaliland.
   - Qorshayaal dhagaraysan oo ka imanayay kooxaha argagixisada kuwaasi oo gaysanayay dilal qorshaysan.
4. **Gaabiska dhinaca amniga.**
   - Inkastoo ay jireen eedaysanayaal loo qabtay, falalkaas Xukuumadu waxa ay ka gaabisay in ay ka warbixiso dilalka ka dhacayay laasacanood iyo cida gaysanaysay.
   - Iyada oo ay ku sugnaayeen ciidan bilays ah iyo ciidan sirdoon balse shacabku kumay gacansiinayn bileyska Qabashada Eedaysanayaasha, iyaga oo baqdin ka qaba kooxaha argagixisada ah.

- Waxa si qaldan loo maamulay mudaharaadyadii dhacay, taasi oo sababtay dhimasho.
- Waxa Gobolka ku sugnaa ciidan beeleedyo mushahar kaliya lagu qarameeyay balse aan ciidan ahaan loo qaramayn laguna dhex darin oo aan la dhex gelin ciidanka qaranka oo ay soo dayaceen xukumadihii kala danbeeyay ee Somaliland.
- Waxa jirtay wadashaqayn la'aan u dhaxaysa masuuliyiinta ka soo jeeda gobolka Sool ee ka tirsan golayaasha Qaranka.
- Waxaa magaalada loo ogolaaday in Garaadadu la soo galaan ciidamo hubaysan iyada oo xukuumadu u ogolaatay in ciidamadii ka mushaharka qaadanayay ciidan walbaaba uu ilaaliyo garaadkiisa oo ku xardhan calankii buluuga ah
- Iyada oo magaalada ay ku suganyihiin ciidamo badan, kooxo argagixiso ah iyo shacab hubaysani ayaa sidoo kale waxa magaalada dhinac kaga sugnaa ciidamada qaranka iyo masuuliyiintii ay xukumadu u dirtay gobolka taasi oo sababtay in weerar gaadmo ah lagu qaado wasiirada ku sugnaa gobolka, halkaasi oo uu ka bilaabmay dagaalku.

**5. Garaadada Gobolka Sool;**

- Garaadada Gobolka Sool Nabad kama talin.
- Garaadadu waxay fursad siyaasi ah u arkeen gadoodkii shacabka
- Fursada Siyaasiga ah ee Garaadadu arkayeen waxay ahayd in ay noqdaan Maamul ka madaxbanaan Somaliland oo hoostaga dawlada fadaraalka Soomaaliya. Sida ku cad bayaanki shirka laascanood.
- Si ay taa u meel mariyaana Garaadadu waxay jiheeyeen Gadoodka shacabka in dagaal lagu qaado ciidanka qaranka Somaliland.
- Wada hadaladii iyo xabad joojintii bilaa shuruuda ahayd ee ay ku dhawaaqday dawlada Somaliland may dhaqangalin garaadadu.

**6. Gaabiska dhinaca Siyaasada;**

- Fullin la'aanta heshiisyadii siyaasiga ahaa ee lala galay Khaatumo.
- Ka jawaabis la'aanta tabashooyinka ee dhinaca awood qaybsiga.

7. **Kooxaha argagixisada ah iyo is bedalka kaga yimid koonfurta soomaliya.**
    - Kooxihii argagixisada ahaa ee laga soo kiciyay koonfurta iyo badhtamaha Soomaaliya, walina waxa ku socda dagaalo lagu wado.
    - Sidaa awgeed Waxay fadhiisimo cusub ka yagleeleen Buuralayda Gal-gala Ee maamulka puntlnad.
    - Waxayna rabaan in ay isku fidiyaan Deegaanada Somaliland Gaar ahaan Magaalada laascanood iyo buuhoodle oo ay ka ka fekerayaan inay ka dhigtaan is bedal istiraaji ah iyo fadhiisimo cusub.
8. **Ictiraaf la'aanta Somaliland;**
    - Ictiraaf la, aanta soomaliland ee 30 ka sano Waxay sababtay Diidmo-Xuduudeedka hada taagaan, ee ku salaysan Isirka.

## 11. Talo Soo Jeedin

Guddidu waxa ay u soo jeedinaysaa Golaha wakiilada Inuu qaraar ka soo saaro qodobada hoos ku qoran.

1. In mar kale laqaato Lana dhaqan galiyo xabad joojin Deg-deg oo bilaa shuruud ah, si looga baaqsado sii socoshada khasaaraha dagaalka.
2. In dhamaan Golayaasha qaranka , Waxgaradka, Culimada, Ganacsatada iyo bulshooyinka kala duwani u guntadaan soo afjarista colaadaasi iyo sidii wada hadal midho dhal ah looga gaadhi lahaa
3. In la soo dhaweeyo Cid wal oo xal u helista laasacanood ka qayb qaadan karta sida bulshada caalamka wadamada jaarka, kuwa gobolka iyo daneeyayaasha kale
4. In Goluhu ugu baaqo kooxaha hubaysan ee ka soo duulay deegaanada ka baxsan xuduudka Soomalilaan ee ka dagaalamaya Laasanood in ay sida ugu dhakhsaha badan uga baxaan.
5. In Goluhu ku taageero ciidanka Qaranka sugida xuduudaha iyo difaaca Qaranka.
6. In Goluhu ka qayb qaato taakulada dadkii muwaadiniinta ahaa ee ku barakacay dagaalka ka socda magaalada laascaanood, isla markaana u soo jeediyo hay'addaha Qaranka iyo kuwa ka shaqeeya Arrimaha bini'aadantinimada in ay gargaar la gaadhsiiyaan iyada oo la raacayo hanaanka qorshaysan ee Qaranka.
7. In Goluhu Dar-dargaliyo wax kasta oo xoojinaya midnimada iyo wada jirka Qaranimada Somaliland.
8. In Goluhu xukuumada u soo jeediyo in khaladaadkii maamul ee ka dhacay laascaanood ay noqdaan kuwo wax laga barto si aanay mar danbe inoogu dhicin qaladaad noocan oo kale ah oo hagardaameeya Qaranka.
9. In, iyada oo la fulinayo heshiisyadadii hore ee la galay iyo baahiyaha guud ee yaala dalkaba, dib u eegis lagu sameeyo Dastuurka qaranka.
10. In laga fogaado hadalada nacaybka ah ee sii kala fogaynaya qaybaha bulshada ee la isku marinayo baraha bulshada (si waafaqsan xeerka ciqaabta guud qodobadiisa 444, 328aad, 221aad iyo 215aad).

11. In laga heshiiyo muranka doorosho ee hada taagan, si looga baxo khilaafaadka siyaasiga ah.
12. In xukuumadu shaaciso dadka ay u qabato falalka argagixiso iyo danbiyada abaabulan.
13. Adkeynta mas'uuliyadda baarlamaanaka si loo xoojiyo dimuqraadiyadda, kor u qaadida, ilaalinta iyo dhiirigelinta ixtiraamka xuquuqda aadanaha, taageero wada hadalka, dhiirigelinta xallinta khilaafaadka gudaha, qaado dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si loo xoojiyo midnimo qaran iyo gorgortan nabadeed oo dhex mara bulshada iyo hogaanka dhaqanka, Wax-garadka Sool iyo Xukumadda Somaliland.
14. Waxay hoosta ka xariiqaysaa in caqabadaha dhaqan dhaqaale, korodhka dhalinyarada iyo isbadelka cimilada ay sababi karaan xasilooni darro bulsho. Hay'addaha ku shaqada lihina ay ka qaataan doorka ka khuseeya.
15. Waxaa inagu waajib ah ka hortaga faragelinta shisheeye ee khatarta ku ah, midnimada, nabadgelyadda, Israacsanaanta dhuleed, Madax-bannaanida iyo dawladnimo Somaliland. Sidaa awgeed waa in goluhu sameeyaa xeerarka lagu ilaalinayo xuduudaha Badda, Berriga iyo Hawadda (si waafaqsan Qodbka 38aad farqadiisa 4aad xarafkiisa "B" ee Dastuurka.
16. In waxay u soo jeedinaysaa bulshada caalamka iyo dalalka dunidu inay aqoonsi buuxa siiyaan jamhuuriyada soomaliland.
17. Waxay u soo jeedinaysa Golaha wax ka bedalka iyo kaabista xeerka Ilaalinta anshaxa iyo nabadgalyada guud iyo xeerka ciidanka booliska, iyo curinta xeerka ciidanka qaranka iyo xeerka la dagaalanka argagixisada.
18. In Golaha Guurtidu qaataan Doorkooda nabadaynta iyo xalinta khilaafaadka gudaha.

## 12. Gabo-gabo (Conclusions).

Gudidan Gaarka ahi, iyo Golaha Wakiiladu iyagoo aaminsan amniga iyo masaaliixda geeska Afrika ee ay isku-xidhan yihiin, maadaama badi wadamada gobolka ay ku noolyihiin qoomiyado Soomaaliyeed ahna dad isir, dhaqan, dhiig iyo isku-tiirsanaan kaleba wadaaggaa, diyaarna u tahay fududdeynta wax kasta oo lagu xaqiijinayo daminta xaaladaha Colaaleed ee ka taagan Magaalada Laascaanood, waxay soo dhaweynaysaa cid kasta oo ergo dhexdhexaada oo arrintan qayb ka noqon karta.

Iyagoo dhaman dhawraya qawaaniinta Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland waxkasta oo heshiis lagu galo oo kasoo horjeeda shuruucda dalkuna waa waxba Kama jiraan. Sidoo kale Guddidu waxay uga digaysaa cid kata oo sii hurinaysa Colaada Laascaanood, AF iyo Adinba in ay ka waantoobaan.

Sidaa darteeed waxaanu Gole weynaha ka codsanaynaa in Iyana ay waajibaadkooda ka gutaan, tixgaliyaana talooyinka aanu soo jeedinay.

| Tirsi | Magaca | [illegible] |
|---|---|---|
| 1. | Md. Axmed Cabdi Ibrahim (Timo-jilic) | |
| 2. | Md. Cabdinasir Yuusuf Cismaan | |
| 3. | Md. Barkhad Jaamac Batuun | |
| 4. | Md. Maxamed Xasan Siciid | |
| 5. | Md. Cali Xuseen Beegsi | |
| 6. | Md. Axmed Muuse Jaamac | |
| 7. | Md. Suleiman Mohamed Farah (Goox) | |
| 8. | Md. Mukhtaar Xassan Maydhane | |
| 9. | Md. Xassan Saleeban (Dhuxul Laab-saalax) | |
| 10. | Md. Cabdilaahi Muuse Cabdi | |
| 11. | Md. Xuseen Ismaaciil ~~Yuusuf~~ Aden. | |

19 | Page